

HIRGELINTA HESHIISKA JABUUTI :
JOOJINTA COLAADDA HUBEYSAN

26 OKTOOBAR 2008

Hordhac :

Iyadoo la raacaayo Heshiiskii Jabuuti ee 19ka Agoosto 2008, laga billaabo 26ka Oktoobar 2008, dhinacayada , TFG iyo ARS waxay go'aansadeen :

I. Joojinta colaadda iyo kor u qaadista wacyiga dadka

1. In ay joojiyaan abuurka colaadda, iyadoo la adeegsanaayo warbaahinta dalka gudahiisa iyo dibaddiisaba.
2. Waxay ugu baaqayaan tageerayaasha labada dhinac iyo dadka Soomaaliyeedba in ay u hoggaansamaan, taageeranna joojinta colaadda hubeysan, si loogu daneeyo maslaxadda Soomaaliya.

II. Xabab joojin.

3. Laga billaabo 26ka Oktoobar 2008, waxaa lagu dhawaaqay dhowris xabab joojin, waxayna hirgeleysaa laga billaabo 5ta November 2008.
4. Ciidanka hordhaca ah ee soo celinta nabadda iyo amniga Magaalada Muqdisho iyo meelaha kaleba wuxuu diyaar ku noqonaayaa muddo 45 cisho gudahooda, oo dib loo cusbooneysiin karo, kana billaabanaysa 10ka Nofeembar 2008.

III. Guuritaanka Ciidamada Itoobiya.

5. Laga billaabo 21ka November 2008, ciidamada Itoobiya waxay ka guurayaan goobaha ay dadweynuhu deggenyihiin ee magaalooyinka Beledweyne iyo Muqdisho sida Towfiq, Garoonka Ciyaaraha, Warshadda Baastada, Xayle Bariise iyo Xarunta Wasaaradda Gaashaandhigga.
6. Nabadgelyada goobaha ay banneeyaan Ciidamada Itoobiya waxaa marka hore la wareegaya mas'uuliyaddooda Ciidamada AMISOM oo kaashanaaya Ciidamada TFG da iyo Ciidamada ARS ta, inta dalka la keenaayo Ciidamada Nabad Ilaalinta ee Qarramada Midoobay.
7. Wejiga labaad ee bixitaanka ciidamada Itoobiya waa inuu ku gebagaboobaa 120 maalmood gudahood, sida uu qabo Heshiiskii Jabuuti ee 19 kii Agoosto 2008.

IV. Mas'uuliyadda.

8. Wejiga hore, TFG iyo ARS waxay diyaarinaayaan ciidamo Boolis oo tiradoodu dhantahay 10.000, si ay u ilaaliyaan ammaanka iyo nabadgelyada Muqdisho iyo Gobollada kale. UNPOS waxaa laga codsanayaa inay daboosho baahida dhaqaale ee ciidanka laga Bilaabo 5ta November 2008.
9. Laga billaabo 10ka November 2008, laguna daro 15 maalmood, Guddiga Wada-jirka ah ee Arrimaha Nabadgelyada iyo Guddi hoosaadyadiisa waxay ku shaqeynayaan Soomaaliya, si ay u hirgeliyaan xabab joojinta guud.
10. Guddiga Wada-jirka ah ee Arrimaha Nabadgelyada wuxuu u hawlgalayaa badbaadada kaalmada bani'aadanimo iyo gaarsiinteedaba.
11. Tafaasiisha farsamada militeriga ee heshiiskani waxaa lagu diyaarinayaa muddo 10 cisho gudahood ah oo ka bilaabanaysa marka la saxiixo dokumentigan.

Handwritten signature

Handwritten notes: M... B... E

Handwritten signature

Dawladda Fedraalka KMG ee Soomaaliya

Handwritten signature

Isbahaysiga Dib U Xoreynta Soomaaliya

Goob Joogeyaal

Handwritten signature

Qarramada Midoobay

Handwritten signature

Midowga Afrika